



30-ka Juun: Tallaalo BILAASH ah laga bixinayo Dugsiga Sare ee Roosevelt - Boos celin Looma Baahna

25-ka Juun, 2021

Qoysaska Sharafta leh ee PPS,

Waxaan rabnaa inaan ku ogaysiino fursadda soo socota ee ah inaad ku **hesho tallaalka COVID-19 lacag la'aan**:

- **Goorta:** Arbacada, 30-ka Juun (tallaalka koowaad) iyo Arbacada, 21-ka Julaay (tallaalka labaad)
- **Goobta:** Roosevelt High School, 6941 N. Central St.
- **Haddaad jeceshahay inaad ballan sii qabsato:** Wac 503-988-3392. Tallaalada bilaa ballanta ah ayaa sidoo kale la bixin doonaa 9:30 g.h. ilaa 4 g.d. **Ballantu daruuri ma aha.**
- **Cidda u qalanta:** Qof kasta oo 12 jir ama ka wayn ah. Hase yeeshee, kuwa 12 ilaa 14 jirka ah waxay u baahan doonaan inay la socdaan oo ay oggolaansho ka helaan waalid ama masuul.

Tallaalada waxaa maamuli doona Xarunta Caafimaadka Ardayda ee Degmada Multnomah. Waxaan ku dhiirgalinaynaa qofkasta oo aan la tallaalin inuu ka faa'iidaysto fursaddan bilaa lacaga ah si aad u ilaaliso naftaada iyo qoyskaaga.